

# Xuquuqda Muwaadiniinta ee Degaanka Guryaha Caawinta La Siiyo ee Minnesota

Ka hor inta aan la helin adeegyo, degganayaasha waxay xaq u leeyihiin in xaruntu si cad ugu wargeliso xuquuqdooda sida ku cad qaybtaan iyo tallaabooyinka la qaado haddii xuquuqda la jabiyo. Macluumaadku waa inuu ahaadaa mid luqad si fudud loo fahmi karo oo ay fahmi karaan degganayaasha. Xaruntu waa inay degaan mas'uul ku salaysan u sameysaa dadka qaba naafonimada isgaarsiinta iyo kuwa ku hadla luuqad aan Ingiriis ahayn. Marka bixiyeyaashu ay jabiyaan xuquuqaha ku xusan qaybtaan, waxay wajahi doonaan ganaaxyo iyo tallaabooyin laysan siinta la xiriira.

Bixiyeyaashu waa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Inay siyaan degganaha ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda qaybta [Minnesota Statutes, section 144G.91 \(https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144G.91\)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144G.91) ka hor inta aan la bilaabin adeegyada degganahaas. Xaruntu waa inay sameysaa dadaal kasta oo macquul ah si ay ugu wargeliso xuquuqdaas luqad uu fahmi karo degganaha.
- Ku dar faahfaahin ku saabsan sida loo gudbin karo cabasho ama looga warbixiyo tacadiyo la tuhunsan yahay. Faahfaahintani waa inay sidoo kale ku jirtaa qodob ka hortagaya cawaaqib xumo ka dhalata cabasho.
- Ka hel degganaha qirasho qoraal ah oo ku saabsan helitaanka xuquuqda degganayaasha la caawiyo ama waa inay sheegtaa sababta aan loo heli Karin qirashadaan. Qirashadaan waa in lagu hayaa diiwaanka degganaha.

## Waafaqsanaanta

Xuquuqda waxay khuseysaa degganayaasha ku nool guryaha dadka caawinta la siiyo ee Minnesota.

### 1. Daryeel iyo Adeegyo Ku Habboon.

Deganayaashu waxay xaq u leeyihiin inay helaan daryeel iyo adeegyo nololaha oo laga caawiyo kuwaas oo ku habboon baahiyadaha deganaha isla markaana waafaqsan qorshe adeeg casri ah oo raacaya heerarka caafimaadka ee la aqbal.

Deganayaashu waxay xaq u leeyihiin inay helaan daryeel caafimaad iyo adeegyo kale ee nololaha oo looga caawiyo si jooqto ah oo ka imaanaya dad si sax ah u tababaran oo aqoon iyo xirfad u leh inay gutaan waajibaadkooda, iyo tiro ku filan oo si wacan u bixiya adeegyada lagu heshiiyay ee ku jira heshiiska nololaha ee caawimaada iyo qorshaha adeegga.

## 2. Diidmada Daryeelka ama Adelgid.

Degganayaasha waxay xaq u leeyihiin inay diidaan daryeelka ama adeegyada laga caawiyo waxayna xaq u leeyihiin in xaruntu u sheegto cawaaqibka xag caafimaad ama xag nafsaaniga ee ka iman kara diidmada daryeelka ama adeegyada.

## 3. Ka Qaybgalka Daryeelka iyo Qorsheynta Adeegyada.

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay si muuqata uga qaybqaataan qorsheynta, wax ka beddelka, qiimeynta daryeelka iyo adeegyada ay helaan. Xuquuqdan waxaa ka mid ah:

- Fursadda ah inay kala hadlaan daryeelka, adeegyada, daaweynta, iyo isbeddelka la xiriira daryeel bixiyeyaasha ku habboon.
- Xuquuqda inay ku daraan wakiilka sharciga ah iyo qofka ay iyagu doorteen.
- Xuquuqda in loo sheego isbeddel kasta oo la soo jeediyay ee qorshaha adeegga ka hor intaan la hirgelin oo ay ka qaybqaataan go'aan qaadashada.

## 4. Daryeel edboon:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in si edboon iyo qadarin leh loola dhaqmo, hantidoodana si qadarin leh loola dhaqmo.

## 5. Xoriyad ka mid ah xadgudubka:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in ay xor ka ahaadaan jir-dil, xadgudub galmo, iyo xadgudub shucuur; dayac; isticmaalka maaliyadeed ee qaldan; iyo dhammaan noocyada xadgudubka ee ku hoos jira Xeerka Difaaca Dadka Nugul.

## 6. Xorriyadda gelitaanka iyo bixitaanka:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay soo galaan ama kabaxaan xarunta sida ay doortaanba. Xuquuqdan waxaa la xadidi karaa oo kaliya marka uu jiro sharci kale oo ogol ee waafaqsan qorshaha adeegga deganaha.

## 7. Xorriyadda shakhsiga:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin xorriyadda shakhsiyeed, hal-abuurka, iyo madax-bannaanida go'aamada nololaha, oo ay ku jiraan dejinta jadwal maalinlaha ah iyo doorashada dadka ay la falgalaan.

## 8. Xaqa in la xakameeyo Xoolahooda:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay xakameeyaan xoolahooda shakhsiga ah.

## 9. Booqashooyinka iyo ka qaybgalka bulshada:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay la kulmaan ama booqasho ka helaan wakhti kasta qoyska deganaha, ilaaliyaha, wakiilka daryeelka caafimaadka, qareenka, wakiilka bulshada, la taliyaha diinta ama shaqada bulshada, ama qof kasta oo deganaha doorto. Xuquuqdan waxaa lagu xadidi karaa xaalado gaar ah haddii loo baahdo caafimaadka iyo badbaadada deganaha oo lagu diiwaangeliyo qorshaha adeegga deganaha.

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay ka qaybqaataan nolosha bulshada iyo hawlaha ay doordeen. Tani waxaa ku jira xuquuqda inay ka qaybqaataan hawlaha ganacsiga, diinta, bulshada, iyo siyaasadda iyada oo aan la faragelin haddii hawlahaasi aysan ku xadgudbin xuquuqda deganeyaasha kale.

## 10. Shaqsiyeedka iyo asturnaanta daryeelka:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in la tixgeliyo gaar ahaankooda, shakhsiyaddooda, iyo aqoonsigooda dhaqanka diinta, taas ka mid caafimaadkoodooda guud ahaan iyo mid maskaxeedba. Shaqaaluhu waa inay ixtiraamaan degeneyaasha shaqsiyadooda birifatiga ah oo hoygooda albaabkiisa garaan iyagoo raadinaya ogolaansho ka hor inta aysan gelin, marka laga reebo xaalad degdeg ah ama haddii aan si kale loo diiwaan gelin qorshaha adeegga deganaha.

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay yeeshaan oo isticmaalaan albaab qufulan ee hoyga deganaha. Xaruntu waa inay bixisaa qufulada hoyga deganaha. Shaqaale baahi gaar ah leh oo kaliya ayaa heli kara furayaasha. Xuquuqdan waxaa lagu xadidi karaa xaalado gaar ah haddii loo baahdo caafimaadka iyo badbaadada deganaha oo lagu diiwaangeliyo qorshaha adeegga deganaha.

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in la ixtiraamo gaar ahaanshahooda iyo asturnaanta qorshaha adeegga deganaha. Doodaha kiisaska, la-tashiyada, baaritaannada, iyo daaweynta waa inay ahaadaan kuwo sir ah oo si taxaddar leh loo sameeyo. Asturnaanta waa in la ixtiraamo inta lagu jiro suuliga, qubeyska, iyo hawlaha kale ee nadaafadda shakhsiga, marka laga reebo baahida badbaadada ama caawinta deganaha.

## 11. Isgaarsiinta shaqsiyeed:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay si gaar ah ula xiriiraan dadka ay doortaan.

Haddii xarunta nolosha ee lagu caawiyo ay soo dirto ama soo qabato boostada deganeyaasha, waa inay sidaas sameeyaan iyada oo aan faragelin.

Deganeyaasha waa in la siiyaa taleefan si ay u sameeyaan oo u helaan wicitaanno.

## 12. Waajib sir qarinta ee diiwaan gelista:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in macluumaadka shakhsiyeedka ah, maaliyadeed, caafimaad, iyo caafimaadka maskaxda ee la ilaaliyo, inay ogolaadaan ama diidaan sii deynta macluumaadka ee dibadda ah aadaya, iyo in la wargeliyo siyaasadaha iyo nidaamyada xarunta ee la xiriira soo bandhigida macluumaadka. Deganeyaasha waa in la wargeliyaa marka diiwaannadooda shakhsiyeed laga soo codsado dibadda.

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay helaan diiwaannadooda.

## 13. Xuquuqda alaabdhiigista iyo qurxinta:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay alaab dhigtaan iyo ay qurxiyaan unugga deganaha iyaga oo raacaya shuruudaha heshiiska caawimaada nolosha.

## 14. Xuquuqda in la doorto qofka lala dego:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay doortaan qofka lala dego haddii ay la wadaagayaan hoy.

## 15. Xuquuqda in la helo cunto:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay cunto helaan wakhti kasta. Xuquuqdan waxaa lagu xadidi karaa xaalado gaar ah xag caafimaadka iyo badbaadada deganaha oo laga diiwaangeliyo qorshaha adeegga deganaha.

## 16. Helitaanka tiknoolajiyada:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay helaan adeegga internetka iyaga oo bixinaya kharashka.

## 17. Cabashooyinka iyo su'aalaha:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay sameeyaan isla markaana helaan jawaab waqti aanan dheereyn ee ah cabasho ama su'aal, taasoo oo aanan xaddidnayn. Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan oo xarun kasta waa inay bixisaa magaca iyo macluumaadka xiriirka ee qofka matalaya xarunta ee loo xilsaaray inuu wax ka qabto oo xalliyo cabashooyinka iyo su'aalaha.

## 18. Helitaanka la-taliye iyo adeegyada difaaca:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay si degdeg ah u helaan:

- La-taliyaha sharciga ah ee deganaha;
- Wakiil kasta oo ka tirsan nidaamka difaaca iyo u doodista ee gobolka u xilsaaray Qaanuunka Federaalka, cinwaanka 45, qaybta 1326.21; ama
- Wakiil kasta oo ka tirsan Xafiiska Ombudsman-ka ee Daryeelka Mudada-Dheer iyo Xafiiska Ombudsman-ka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Naafada Koritaanka.

## 19. Macluumaadka ku saabsan kharashyada:

Kahor inta adeegyada aan la bilaabin, deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in la wargeliyo:

- Dhammaan kharashaadka hoyga iyo adeegyada nolosha ee la caawiyo;
- Xaddidaadaha adeegyada hoyga iyo nolosha ee la heli karo;
- Haddii la ogyahay, inta lacag bixin ee laga filan karo caymiska caafimaadka, barnaamijyada dadweynaha, ama ilo kale; iyo
- Kharashka noocee ah ayay Deganeyaasha mas'uul ka yihiin.

## 20. Macluumaadka ku saabsan shaqsiyaadka bixiya adeegyada:

Kahor inta aan la helin adeegyada lagu aqoonsaday qorshaha adeegga, deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in loo sheego nooca iyo takhasuska shaqaalaha bixiya adeegyada, inta jeer ee la soo jeediyay booqashooyinka la siinayo, iyo xulashooyinka kale ee la heli karo si wax looga qabto baahiyaha deganaha.

## 21. Macluumaadka ku saabsan bixiyeyaasha kale iyo adeegyada:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin in xarunta nolosha ee la caawiyo ay siiso macluumaad ka hor inta aan la saxiixin heshiiska nolosha ee la caawiyo, in adeegyo kale oo dadweyne iyo kuwo gaar loo leeyahay ay heli karaan iyo in deganuhu xaq u leeyahay inuu iibsado, qandaraas la galo, ama helo adeegyo ka baxsan xarunta nolosha ee la caawiyo.

## 22. Golaha Deganeyaasha:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay abaabulaan oo ka qaybqaataan golayaasha deganeyaasha sida lagu qeexay [Minnesota Statutes, qaybta 144G.41, xubin hoosaadka 5aad \(https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144G.41#stat.144G.41.5\)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144G.41#stat.144G.41.5).

## 23. Golaha Qoysaska:

Deganeyaashu waxay xaq u leeyihiin inay ka qaybqaataan golayaasha qoysaska ee ay sameeyeen qoysaska ama deganeyaasha sida lagu qeexay [Minnesota Statutes, qaybta 144G.41, xubin hoosaadka 6aad \(https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144G.41#stat.144G.41.6\)](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/144G.41#stat.144G.41.6).

## Ujeedada Sharciga:

Xuquuqda lagu soo rogay qaybtaan ee faa'iido u leh deganeyaasha ma xaddidi karto xuquuq kale uu sharcigu bixiyo. Xarun kasta ma codsan karto ama ma dalban karto in degane uu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqdan hanoqo wakhti kasta ama sababo kasta oo ay ku jirto shuruudda soo gelitaanka xarunta.

## Keydka aqoonta

Waad la xiriiri kartaa bixiyaha shatigaaga sida hoos lagu muujiyay.

Magaca Ruqsadda Leh: \_\_\_\_\_

Telefoon: \_\_\_\_\_

Email: \_\_\_\_\_

Cinwaan: \_\_\_\_\_

Magaca iyo darajada Qofka dhibaatooyinka ama dacwadaha Loosoo Jeedin Karo: \_\_\_\_\_

## Warbixinta Tacadi, Dayacaad, ama Xadgudub Maaliyadeed oo Loo Geysto Dadka Nugul:

Haddii aad rabto inaad soo warbixiso tacadi, dayacaad, ama xadgudub maaliyadeed oo la tuhunsan yahay, waad la xiriiri kartaa Xarunta Warbixinta Tacadiyada Dadka Waaweyn ee Minnesota (MAARC).

Haddii aad leedahay cabasho ku saabsan xarunta ama qofka bixiya adeegyadaada, waad la xiriiri kartaa Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka, Waaxda Caafimaadka Minnesota. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Xafiiska Ombudsman ee Daryeelka Mudada Dheer ama Xafiiska Ombudsman ee Caafimaadka Maskaxda iyo Horumarinta Naafada.

[Minnesota Vulnerable Adult Protection and Elder Abuse\(https://mn.gov/dhs/adult-protection/\)](https://mn.gov/dhs/adult-protection/)

Telefoon: 1-844-880-1574

**Haddii aad leedahay cabashooyin kale oo aan ahayn tacadi, dayacaad, ama xadgudub maaliyadeed oo loo geysto dadka nugul, fadlan la xiriir Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka Minnesota:**

### **Minnesota Department of Health, Office of Health Facility Complaints**

P.O. Box 64970

St. Paul, Minnesota 55164-0970

Telefoon: 651-201-4200; ama 1-800-369-7994

Fakis: 651-281-9796

Email:[health.ohfc-complaints@state.mn.us](mailto:health.ohfc-complaints@state.mn.us)

Websayt: [Office of Health Facility Complaints](https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/ohfc/index.html)

(<https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/ohfc/index.html>)

## Qirashada Degganaha

Adiga oo saxiixaya hoos, waxaan qirayaa in aan helay macluumaad ka socda bixiyaha caawinta ee sharaxaya xuquuqdayda sida deggane. Waxaan sidoo kale la socdaa sida loo gudbiyo cabasho ama looga warbixiyo tacadi la tuhunsan yahay iyo inaan helay magaca iyo macluumaadka xiriirka qofka loo gudbiyo cabashooyinka.

Magaca Degganaha: \_\_\_\_\_

Saxiixa Degganaha: \_\_\_\_\_

Magaca Wakiilka Degganaha (haddii ay khusayso): \_\_\_\_\_

**Si aad u codsato adeegyada taageerada**, fadlan la xiriir Xafiiska Ombudsman ee Daryeelka Mudada Dheer ama Xafiiska Ombudsman ee Caafimaadka Maskaxda iyo Naafada Horumarinta.

### Office Of Ombudsman for Long-Term Care

P.O. Box 64971

St. Paul, Minnesota 55164-0971

Telefoon: 1-800-657-3591; ama 651-431-2555

Email: [MBA.OOLTC@state.mn.us](mailto:MBA.OOLTC@state.mn.us)

Websayt: [Office Of Ombudsman for Long-Term Care \(https://mn.gov/ooltc/\)](https://mn.gov/ooltc/)

### Office Of Ombudsman for Mental Health And Developmental Disabilities

332 Minnesota Street

Suite W1410, First National Bank Building

St. Paul, Minnesota 55101-2117

Telefoon: 1-800-657-3506; ama 651-757-1800

Email: [Ombudsman.mhdd@state.mn.us](mailto:Ombudsman.mhdd@state.mn.us)

Websayt: [Office Of Ombudsman for Mental Health And Developmental Disabilities \(https://mn.gov/omhdd/\)](https://mn.gov/omhdd/)

**Si Aad U Codsato La-talin Sharciga**, Fadlan La Xiriir Mid-Minnesota Legal Aid/Minnesota Disability Law Center (Nidaamyada Ilaalinta iyo Taageerada).

### Mid-Minnesota Legal Aid/Minnesota Disability Law Center

430 First Avenue North

Suite 300

Minneapolis, Minnesota 55401-1780

Telefoon: 1-800-292-4150

Email: [mndlc@mylegalaid.org](mailto:mndlc@mylegalaid.org)

Websayt: [Mid-Minnesota Legal Aid/Minnesota Disability Law Center \(http://mylegalaid.org/\)](http://mylegalaid.org/)

**Su'aalaha Ku Saabsan Musuqmaasuqa Medicaid ama Dhibaatooyinka Bixinta** ama Lacag-bixinta, Fadlan La Xiriir: Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

**Minnesota Department of Human Services**

Surveillance and Integrity Review Services  
P.O. Box 64982  
St. Paul, Minnesota 55164-0982  
Telefoon: 1-800-657-3750; ama 651-431-2650  
Email: [DHS.SIRS@state.mn.us](mailto:DHS.SIRS@state.mn.us)

**Su'aalaha Ku Saabsan Arrimaha La Xiriira Da'da Guud**, Fadlan La Xiriir Khadka Isku-xidhka Waayeelka.

**Senior Linkage Line, Minnesota Board on Aging**

Khadka Isku-xidhka Waayeelka  
P.O. Box 64976  
St. Paul, Minnesota 55155  
Telefoon: 1-800-333-2433  
Email: [senior.linkage@state.mn.us](mailto:senior.linkage@state.mn.us)  
Websayt: [Minnesota Senior Linkage Line \(https://mn.gov/senior-linkage-line/\)](https://mn.gov/senior-linkage-line/)

**Su'aalaha La Xiriira Guryaha Caawinta La Siiyo**, Fadlan La Xiriir Waaxda Caafimaadka Minnesota, Waaxda Xakamaynta Caafimaadka.

**Minnesota Department of Health, Health Regulation Division**

P.O. Box 64970  
St. Paul, Minnesota 55164-0970  
Telefoon: 651-201-4200  
Email: [health.assistedliving@state.mn.us](mailto:health.assistedliving@state.mn.us)  
Websayt: [Assisted Living Licensure \(https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/assistedliving/\)](https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/assistedliving/)

**Su'aalaha Guud ee La Xiriira Waaxda Caafimaadka Minnesota**, Fadlan La Xiriir Waaxda Caafimaadka Minnesota, Waaxda Xakamaynta Caafimaadka.

Minnesota Department of Health  
Health Regulation Division  
P.O. Box 64970  
St. Paul, MN 55164-0970  
Telefoon: 651-201-4200  
Email: [health.fpc-web@health.state.mn.us](mailto:health.fpc-web@health.state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

07/15/2024

*Si aad macluumaadkaan u hesho qaab kale, wac: 651-201-4200*